

**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha  
Dastuurka**

# **War-Murtiyeed**

## **Shirka Wada-tashiga**

- **Xeerka Nidaamka Garsoorka**
- **Xeerka Dhisidda Maxkamadda Dastuurka &**
- **Hirgelinta Qorshaha iyo Dib-u-habeynta  
Hay'daha Caddaaladda**

**Jazeera Palace Hotel  
13 – 17 Oktoobar 2014**

Annagoo ah ka qeyb-galayaasha shirka wadatashiga ee ku sabsanaa: Xeerka Nidaamka Garsoorka, Xeerka Dhisidda Maxkamadda Dastuurka iyo hirgalinta qorshaha sarreynta sharciga; kana kala yimid Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud ee Qaranka, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda, wakiillo ka socda Baarlamaanka, Maxkamadaha dalka, Maamuladda Gobollada Dalka, Hay'adda Culumada Soomaaliyeed, Ururka Qareenada, Ururka Qareenada Haweenka madaxabannaan, Ururada Bulshada Rayidka ah, Kuliyaadaha sharciga ee Jaamacadaha Dalka iyo Khubaro kale.

Annagoo ka ambaqaadeyna talooyinkii kasoo baxay shirweynihii Qaran ee ka wadatashiga dib u habeynta garsoorka iyo kaabayaashiisa, laguna qabtay Muqdisho 1-5 April 2013.

Annagoo ka duuleyna, tixgalinaynana baahida loo qabo dib-u-habeynta, horumarinta iyo tayeynta hey'adaha cadaaladda Soomaaliyeed.

Waxaan soo-jeedinaynaa:

- In baahi adag loo qabo dib-u-habeynta Xeerka Nidaamka Garsoorka, iyada oo la waafajinayo nidaamka federaaliga ah ee dalku hiigsanayo.
- In si habboon loo kala caddeeyo awoodaha maxkamadaha heer federal iyo kuwa heer dowlad goboleed.
- In erey bixinta iyo qeexiddooda dib-u-eegis lagu sameeyo iyada oo la adeegsanaayo luqad qaanuuni ah.
- Waxaan taageeraynaa in la dhiso Maxkamadda Dastuurka Federaalka sida uu qabo Dastuurka, iyada oolaga duulayo baahida deg-degga ah ee loo qabo.
- Waxaan soo dhaweyneynaa hirgelinta qorshaha iyo dib-u-habeynta hay'adaha caddaaladda ee shirka looga hadlay.
- Waxaan soo dhaweynaynaa dadaalka ay wado Wasaarada Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ee lagu horumarinayo garsoorka iyo hay'adaha kale ee cadaaladda.
- Waxaan ugu baaqeynaa qeybaha kala duwan ee bulshada Soomaaliyeed in ay garab istagaan dadaalka ay wado wasaaradda caddaaladda.
- Waxaan u mahadcelinaynaa dhamaan dadkii ka qeybqaatay diyaarinta barnaamijkan iyo kuwii dadaalka gaarka ah ka muujiyey ka qeybgalkiisa iyo hagiiddiisa oo uu ugu horreeyo Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka.
- Ugu danbeytii waxaan ugu baaqeynaa Xukuumadda Federaalka iyo Baarlamaanka Soomaaliyeed in ay ansixiyaan Xeerarka Nidaamka Garsoorka iyo Dhisidda Maxkamada Dastuurka.